DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

# Su'aalaha Inta Badan Waalidku Weydiiyo ee Baaritaanka Carruurnimada Hore

## Waa maxay baaritaanka carruurnimada hore?

Baaritaanka Carruurnimada Hore waa barnaamij bilaash ah oo ka jira Minnesota kaas oo hubinaya sida ilmuhu u korayo iyo sida uu u kobcayo. Baaritaanku wuxuu ka taageeraa carruurta inay noqdaan kuwo guulaysta waxayna kor u qaadaa natiijooyin horumarka oo wanaagsan. Baaritaanka waxa kale oo laga yaabaa in uu horseedo u gudbin fursadaha waxbarashada carruurnimada hore.

## Goorma ayaan Ballansanayaa Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Barnaamijka Baaritaanka Carruurnimada Hore waxa ay heli karaan carruurtu marka ay saddex sano gaaraan. Ardaydu waa inay dhammaystiraan barnaamijkan kahor intaysan bilaabin dugsiga barbaarinta ama 30 maalmood gudahooda marka ay bilaabaan kindergarten ama fasalka koowaad. Inkastoo ilmahaaga la baaru karo wakhti kasta kindergartenka kahor, waxa fiican in la sameeyo inta u dhaxaysa da'da saddex iyo afar sano si wixii welwel ah ee caafimaadka ama korriinka ah wax looga qabto sida ugu dhakhsaha badan. Baaritaan u dhigma oo uu sameeyo daryeel bixiye caafimaad oo aan iskuulka ahayn, sida Head Start, Child & Teen Checkups ama bixiyaha daryeelka caafimaadka, ayuu sidoo kale aqbali doonaa iskuulka degmadu.



## Sidee ayaan Ballansanayaa Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Degmooyinka iskuuladu waxay bixiyaan Baaritaanka Carruurnimada Hore sanadka oo dhan. Waxaad la xiriiri kartaa degmadaada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah markuu ilmahaagu saddex jirsado. Si aad u hesho degmada dugsigaaga, ciwaankaaga geli gis.lcc.mn.gov/iMaps/schooldistricts.

## Maxaa dhacaya Inta lagu jiro xilliga la samaynayo Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Baarista Carruurnimada Hore waxaa uu fiirinayaa caafimaadka iyo korriinka ilmahaaga. Baaritaanka degmooyinka iskuulada waxaa inta badan sameeya macalin iyo kalkaaliye. Baaritaanka waxaa ka mid ah dib u eegista dhererka, miisaanka, aragga, maqalka, tallaalada, hadalka, caafimaadka bulshada iyo shucuurta dareenka iyo guud ahaan korriinka. Baaritaanka waxaa lagu sameeyaa iyadoo lagu salaynayo da'da ilmaha, sidaas darteed ilmaha saddex jirka ah ayaa la waydiiyaa oo kaliya waxa ku habboon da'dooda.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu uuna ku hadlin Ingiriisiga?

Haddii adiga ama ilmahaagu aydaan ku hadlin Ingiriisi, degmadaadu waxay ku siin kartaa turjubaan. Marka ilmuhu baranayo laba luqadood, waxa fiican in baaritaanka loogu sameeyo luqadda ay inta badan maqlaan. Baaritaanka waxaa lagu samayn karaa Ingiriisi iyo luqadda guriga ee ilmaha iyadoo la adeegsanayo turjubaan.

dcyf.mn.gov
dcyf.els@state.mn.us

# Su'aalaha Inta Badan Waalidku Weydiiyo ee Baaritaanka Carruurnimada Hore

## Sideen Isugu Diyaariyaa Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Waa inaad keento magacyada iyo lambarada teleefanka dhakhtarka carruurta ee ilmahaaga, qoraalada bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo diiwaanka tallaalka. Waxa kale oo aad keeni kartaa qoraalada ku saabsan:

- Waxyaabaha uu ilmahaagu si fiican u qabto
- Su'aalaha ku saabsan caafimaadka ilmahaaga
- Su'aalaha ku saabsan korriinka ilmahaaga, sida waxbarashada, socodka ama hadalka
- Su'aalaha ku saabsan aragga ama maqalka ilmahaaga

## Maxaa dhacaya haddii Baaruhu uu arko walaac inta lagu jiro Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Waxaa jira dhawr fursadood oo kala duwan haddii baaraha xirfadlaha ahi uu helo meelo walaac ka jiro oo ku saabsan korriinka ilmahaaga.

Baaraha iyo waalidka ayaa laga yaabaa inay go'aansadaan inay u gudbiyaan ilmahaaga qiimayn ay ku sameeyaan degmada iskuulku ama rugta caafimaadku. Baaruhu waxa kale oo laga yaabaa inuu kaala shaqeeyo inuu u gudbiyo ilmahaaga fursadaha kale ee caruurnimada hore sida Head Start, School Readiness, Early Childhood Family Education, Deeqaha Waxbarashada Early Learning Scholarships barnaamijyada Pre-Kindergarten, Booqashada Guriga ee Caafimaadka Dadweynaha iyo khayraadka kale ee bulshada.

## Baaritaanku miyuu keeni doonaa in lagu aqoonsado in ilmahaygu cudur qabo?

Haddii welwel caafimaadka ama korriinka ah la helo inta lagu jiro baaritaanka, waalidka iyo baaruhu waxay go'aansan karaan in qiimeyn dheeraad ah oo uu sameeyo xirfadle caafimaadka ama waxbarashada ah loo baahan yahay. Helitaanka goor hore ah waxay hubisaa in carruurta iyo qoysasku helaan waxbaris, adeegyo iyo taageerooyin si ay ugu guulaystaan iskuulka.

## Waalidku miyuu wax k Dhihi karaa in Ilmaha loo gudbiyo waxbarashada gaarka ah iyo in kale?

Aragtida waalidka, sida ilmuhu u korayo, ayaa had iyo jeer lagu daraa marka laga hadlayo macluumaadka u gudbinta. U gudbinta waxbarashada gaarka ah waxaa samayn kara waalidka ama shaqaalaha Baaritaanka Carruurnimada Hore. Kooxda Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore ayaa laga yaabaa inay markaas siiyaan qiimayn ay sameeyeen xirfadlayaasha ku habboon si ay u eegaan haddii ilmuhu u qalmo inuu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee bilaashka ah. Adeegyadan waxaa laga yaabaa in lagu bixiyo guriga, goobta daryeelka caruurta ama iskuulka ilmaha.

## Ma diidi karaa Baaritaanka Carruurnimada Hore?

Haa, haddii waalidku diido ama ka horyimaado inuu ka qaybqaato barnaamijka baaritaanka ilmahooda, ilmuhu uma baahna inuu dhammaystiro baaritaanka. Utixraac Xeerka Minnesota 142D.091.

**dcyf.mn.gov**
**dcyf.els@state.mn.us**